## SUURAT AL-MAACUUN:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

**1. Ka warrama kan beenin Abaal-marinta (Qiyaamada)**

**2. Kaas xooga Agoonta (xaqeeda).**

**3. Aan kuna boorrinaynin quudinta miskiinka**

**4. Waxaa halaag u sugnaaday kuwa tukan (waa Munaafiqiinta)**

**5. Ee haddana halmaansan Salaaddooda**

**6. Dadkana is tusiya.**

**7. Una diida alaabta (laysugu kaalmeeyo)**

Qur'an 107: 1-7

**Sharaxa Suuradaan:**
Abaalmarinta oo la beeniyo, Agoontoo la dhibo, Masaakiintoo wax lagu sadaqaysanin, Salaaddoo layska hilmaamo, Dadkoo lays tustusiyo iyo Kaalmadoo la ceshado waa arrimo xun xun oyna wanaagsanayn in loo dhawaado. Rasuulkii Eebe wuxuu yidhi (Nabadglyo iyo Nasariis Korkiisa Eebe ha yeele) Ruuxii dadka maqashiiya camalkiisa Eebana wuxuu maqashiiyaa khalqigiisa wuuna xaqiraa wuuna yareeyaa.

Waxaa wariyay Imaam Axmad.